



# Orientation to Ontario

## KA SHAQAYNTA ONTARIO

### U DIYAAR GAROOWGA SHAQADA

Si aad u shaqayso, waa inaad heshaa Lambarka Caymiska Bulshada (SIN). Si aad u barato sida loo codsado lambarka, booqo Service Canada oo aad ka helayso [servicecanada.gc.ca](http://servicecanada.gc.ca) ama [findlink.at/SIN](http://findlink.at/SIN)

### QIIMAYNTA SHAHAADADA

Qiimayn ayaa waafajinaysa tababarka iyo waxbarashada aad kusoo qaadatay banaanka Canada heerka u dhigma ee nidaamka waxbarashada Canada.

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato ama aadan u baahan qiimayntaan. Waxaa ugu habboon inaad ogaato haddii aad u baahan tahay qiimaynta shahaadada kahor intaadan codsan shaqooyinka. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo Xarunta Xogta ee Canada ee Shahaadooyinka Caalamiga ah oo aad ka helayso [cicic.ca](http://cicic.ca) ama [findlink.at/cicic-cred](http://findlink.at/cicic-cred)

### SHAQOYINKA RUQSADA LEH IYO KUWA AAN LAHAYN

Si aad uga shaqayso shaqo aan ruqsad u baahnayn, uma baahnid inaad haysato ruqsad gaar ah.

Shaqooyinka aan shuruudaha lagu xirin waxaa ku jira maamuleyaasha dhaqaalaha, dhaqaale-yahannada, xirfadleeyda kumbuyuutada, diiwaan hayeyaasha, wakiillada iibka, maareeyaasha tafaariiqda yo kuwo kale.

Waxaa jira shaqooyinka qaar oo shahaado la heli karo laakiin qasab maaha shahaado si aad uga shaqayso Ontario.

Waxaa loo yaqaanaa shaqooyinka iskood isku maamula tusaalaha shaqadaan waa la taliyaha arimaha shaqaalaha. Loo shaqeeyaal badan ayaa qorta xirfadleyaasha shahaadada haysta inkastoo uusan sharcigu qasab ka dhigayn.

### SHAQOYINKA SHURUUDAHA LEH

Si aad uga shaqayso shaqo shuruudo leh, waxaad u baahan tahay ruqsad gaar ah oo ay ku siisay haayada sharciga ee Ontario. Shaqooyinka ruqsada u baahan waxaa ku jira shaqaalaha bulshada, kalkaalisada, baxnaaniyaha masaajka, korontiistaha, tuubeystaha, injineerka, farshaxanka dhismaha iyo kuwo kale.

Si aad u ogaato in shaqadaadu ay ruqsad u baahan tahay, aysan u baahnayn ama aysan u baahnayn shahaado booqo [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/occup](http://findlink.at/occup)

Si aad u hesho xog ku saabsan ruqsad qaadashada, wac Global Experience Ontario oo aad ka helayso [1-866-670-4094](tel:1-866-670-4094) ama booqo [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/GlobalExpe](http://findlink.at/GlobalExpe)

### GLOBAL EXPERIENCE ONTARIO (GEO)

Global Experience Ontario waxay bixisaa adeegyo kaladuwan oo la siiyo shaqsiyaadka tababarka kusoo qaatay aduunka kuwaasoo ka shaqeeya xirfad ruqsad leh ama ganacsi qasab ay tahay ruqsadu oo aan ahayn mid caafimaad. Si aad u la xariirto GEO, wac [1-866-670-4094](tel:1-866-670-4094) ama booqo [ontario.ca](http://ontario.ca)

### HEALTHFORCE ONTARIO

HealthForceOntario waxay xog ka bixisaa ruqsadaynta iyo dookhyada xirfada ee xirfadleeyda caafimaadka ee aduunyada kusoo tababartay. Si aad u la xariirto HealthForce-Ontario, wac [1-800-596-4046](tel:1-800-596-4046) ama booqo [healthforceontario.ca](http://healthforceontario.ca) ama [findlink.at/healthprofs](http://findlink.at/healthprofs)

### BARNAAMIJYADA KAABISTA WAXBARASHADA

Barnaamijyada kaabista ayaa bixiya tababar iyo khibrada shaqada oo la siiyo

1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>



Funded by / Financé par

shaqaalaha caalamka kusoo tababartay iyo sidoo kale caawimaada shaqo raadinta. Barnaamijyadaan ayaa sidoo kale kaa caawin kara helitaanka ruqsad aad ugu baahan tahay si aad ugu shaqayso xirfadaada ruqsada leh.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada kabista ah ee deegaankaaga, booqo [canada.ca](http://canada.ca) ama [findlink.at/training](http://findlink.at/training)

### RAADINTA SHAQO

Barnaamijyada iyo webseedyada soo socda ayaa ka caawiya dadka wadanka ku cusub barashada suuqa shaqaalaha iyo helitaanka shaqo.

- Xogta suuqa shaqaalaha ee Ontario: [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/LMI](http://findlink.at/LMI)
- Tasmada Working in Canada: [workingincanada.gc.ca](http://workingincanada.gc.ca)
- [settlement.org](http://settlement.org) ama [findlink.at/Employinfo](http://findlink.at/Employinfo)
- Kaydka Xogta shaqooyinka ee Service Canada: [jobbank.gc.ca](http://jobbank.gc.ca)

### CODSASHADA SHAQO

Employment Ontario - Marka aad shaqo raadinayso, waxaad u baahan tahay xogta saxda ah ee la xariirta xirfadaha muhiimka ah iyo khibrada shaqooyinka banaan iyo sidoo kale fursadaha tababarka. Waxaad sidoo kale u baahan tah y inaad samaysato CV aadna barato sida loo maro wareysi waxtar leh.

Si aad wax uga barato xirfadahaan iyo farsamooyinka aadna u hesho adeegyada kale ee shaqada la xariira, booqo xafiiska Employment Ontario ee deegaankaaga. Si aad u hesho xafiiska Employment Ontario wac [1-800-387-5514](tel:1-800-387-5514) ama booqo [tcu.gov.on](http://tcu.gov.on) ama [findlink.at/ineedajob](http://findlink.at/ineedajob)

Si aad u hesho xog guud, wac Xarunta Xariirka ee Employment Ontario oo aad ka wacayso [1-800-387-5656](tel:1-800-387-5656).

Adeegga waxaa lagu heli karaa Ingiriis, Faransiis iyoluuqado kale.

**Canada Job Bank** - Marka lagasoo tago liiska shaqooyinka la heli karo, Canada Job Bank ayaa bixisa xog ku saabsan tababarka iyo xirfadaha.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo [workingincanada.gc.ca](http://workingincanada.gc.ca) ama [jobsetc.gc.ca](http://jobsetc.gc.ca)

### MUTADAWACNIMADA IYO TABABARKA SHAQADA

Mutadawacnimadu waa qaab wanaagsan oo aad ku baranayso xirfado cusub, aad ku baranayso khibrad aadna ku helayso xariirka shirkadaha aad shaqada ka helayso. Tababarka shaqadu waa fursad lagu helo khibrada shaqada oo muddo kooban ah.

Tababarada shaqada qaar ayaa mushaar lagu qaataa, qaarna waa fursado mutadawacnimo ah.

Wac 211 oo waydii goobta aad ka helayso xarunta mutadawacnimada ee deegaankaaga.

Booqo barta Shabakada Xarunta Mutadawacnimada ee Ontario [ovcn.ca](http://ovcn.ca)

Career Edgewaxay siinaysaa tababarada shaqada oo la xariira shaqooyinka kaladuwan ee aan ruqsada u baahnayn, Si aad u hesho xog dheeraad ah, wac [1-888-507-3343](tel:1-888-507-3343) ama booqo [careeredge.ca](http://careeredge.ca)

### XUQUUQAHA GOOBTA SHAQADA

#### Xeerka Xuquuqaha Aadanaha ee Ontario

- Sida ku cad xeerka, waa sharci daro in qofka lagu takooro ama loo dhibaateeyo sabab la xariirta da'diisa, isirkiisa, wadanka uu ka yimid, qoomiyadiisa, diintiisa, naafada, xaalada qoyska, aqoonsiga jinsiga ama dookha galmada. Baro sida Xeerku u difaacaayo sinnaanta ka jirta goobta shaqada gudaha Ontario

Gudiga Xuquuqaha Aadanaha: [ohrc.on.ca](http://ohrc.on.ca) ama [findlink.at/ohrcemploy](http://findlink.at/ohrcemploy)

#### SHARCIGA HEERARKA SHAQADA (ESA)

Sharcigaan wuxuu dejinayaa heerarka laga doonaayo loo shaqeeyaasha iyo shaqaaluhu inay raacaan ayna ku jiraan saacadaha, mushaarka iyo goobta shaqada. Si aad xog badan uga ogaato, wac Xarunta Xogta ee Wasaarada Heerarka Shaqada [1-800-531-5551](tel:1-800-531-5551) ama booqo [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/err](http://findlink.at/err)

#### Sharciga Caafimaadka iyo Badqabka Shaqada

Sharcigaan ayaa difaacaaya caafimaadka iyo badqabka shaqaalaha wuxuuna qeexayaa waajibada loo shaqeeyaasha. Xog badan ka ogoow badqabka goobta shaqada iyo xuquuqdaada ka shaqaale ahaan barta [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/hsafety](http://findlink.at/hsafety)

Wacyi gelinta Caafimaadka iyo Badqabka shaqaalaha oo 4 Qodob ah waa daabacaad kasoo baxday Wasaarada Shaqaalaha. Si aad u codsato nuqul, wac Service Ontario [1-800-267-8097](tel:1-800-267-8097) ama booqo [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/hsawarenes](http://findlink.at/hsawarenes)

Si aad usoo sheegto cilad badqabka goobta shaqada, wac [1-877-202-0008](tel:1-877-202-0008).

#### MAGDHAWGA SHAQAAAHA

Haddii aad ku dhaawacanto shaqada, waxaad u qalmi artaa magdhawga shaqaalaha oo aad ka helayso Gudiga Badqabka iyo Caymiska Goobta Shaqada ee Ontario (WSIB). Si aad u hesho xog dheeraad ah, wac [1-800-387-0750](tel:1-800-387-0750) ama booqo WSIB [wsib.ca](http://wsib.ca)

